Sida loo noqdo

# Shaqaalaha daryeelka guriga

## Hagaha Tallaabo-ka-Tallaabada ah

Taageer dadka waaweyn iyo dadka jir ahaan naafada ah.

**Jiheeyeyaasha Bixiyaha ayaa halkan u joogo inay ku caawiyaan.**

Waxay kaa caawin karaan tallaabo kasta oo ah geedi-socodka diiwaangelinta ee daryeelka guriga. Sidoo kale waxay kaa caawin karaan shaqo raadinta.

**Wax badan ka ogow barnaamijka oo isdiiwaangeli.**

1. **Dib u eeg foomamka codsiga. Raadi xafiis kuu dhow.**
2. **Aad xafiiska si aad u codsato. Horay u soo qaado aqoonsi sax ah.**
3. **Buuxi foomamka hubinta sooyaalka.**
4. **Booqo hanuuninta. Akhri Hagaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga.**
5. **Ku hel boosto warqad soo dhawayn ah iyo lambarka adeeg-bixiyaha.**
6. **Dhammaystir tababarka bilaashka ah ee shaqaalaha cusub.**
7. **Samayso akoono si aad shaqo u hesho, raadraac saacadaha oo hel lacag.**
8. **Hel oggolaanshaha inaad la shaqayso qof kasta oo aad taageerto.**
9. **Bilow shaqada taariikhda lagu heshiiyay.**

**Ma ogtahay?** Waxa kale oo aad codsan kartaa inaad noqoto Kaaliyaha Daryeelka Gaarka ah, Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah iyo Tababaraha Shaqo ee Shaqaalaha Taageerada Gaarka ah. Isku mar ayaa laguu diiwaangelin karaa doorarka oo dhan.

**Wax badan ka ogow tallaabo kasta adoo ka bilaabaya bogga 2.**

OREGON Home Care COMMISSION

**Shaqada muhiimka ah waxay ka bilaabataa halkan.**
Codso Hadda: OregonHomeCareJobs.com

Sida loo noqdo

# Shaqaalaha daryeelka guriga

Macluumaad dheeri ah oo tallaabo-tallaabo ah

**Hubi iimaylkaga marar badan, oo ay ku jiraan spamka iyo galka qashinka. Waxaad heli doontaa farriimaha:**

- Weydiiso inaad qaado tallaabo si aad u sii wadato codsiga
- Inaad wadaagto macluumaad ku saabsan tallaabooyinka xiga
- Lagaaga dalbanayo macluumaad dheeri ah oo adiga kugu saabsan

## 1 Is-diyaari oo dib u eeg

Dib u eeg foomamka codsiga. Isticmaal khariidadan onlaynka ah si aad u hesho xafiis kuu dhow. Dooro "adeegyada dadka waaweyn."

## 2 Aad xafiiska si aad u codsato

Buuxi foomamka codsiga ka hor intaadan tagin ama inta aad xafiiska joogto.

**Waa inaad si shakhsi ah u tagtaa si aad u buuxiso foomka I-9. Waa inaad keentaa** dukumeenti sax ah oo muujinaya qofka aad tahay iyo inaad haysato oggolaansho sharci ah oo aad ku shaqayso. Dukumeentiyadani waxay ku taxan yihiin foomka I-9.

## 3 Buuxi foomamka hubinta sooyaalka

Iimayl ayaad ka heli doontaa ORCHARDS. Kani waa nidaamka loo isticmaalo hubinta sooyaalka. .imaylku wuxuu ku siin doonaa tallaabooyinka loo maro baaritaanka sooyaalkaaga.

**Tan waxaa lagu samayn karaa oo keliya onlayn** iyada oo loo marayo degelka ORCHARDS.

**Muhiim ah: Waa inaad marto hubinta sooyaalka toddobo maalmood gudahooda kadib marka aad hesho iimaylka.** Haddii aad u baahan tahay inaad hesho faraha waxaad haysataa 21 maalmood inaad ku dhammayso tallaabadaas. Haddii aad ku dhammayn tillaabooyinka wakhtiga la siiyay, waxaad u baahan doontaa inaad mar kale bilowdo hawsha. Waxay qaadataa saddex ilaa lix toddobaad inaad u hesho natiijada baaritaanka sooyaalkaaga.

## 4 Booqo hanuuninta oo akhri Hagaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga

Waxaa jira hanuunin loogu talagalay Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee cusub. Jihaynta waa qof ahaan. Waa lix saacadood. Si aad isu diiwaangeliso, booqo Degelka Waxbarashada ee Carewell.

Waa inaad sidoo kale akhridaa Hagaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga. Waxaa jira foomka qirashada oo ay tahay inaad saxiixdo marka aad dhammayso akhrinta hagaha. Waxaad foomka u soo diri doontaa xafiiska deegaankaaga adoo isticmaalaya iimaylka ay ku siinayaan.

**Waxaad aadi kartaa hanuuninta waxaadna akhriyi kartaa hagaha inta ay socoto hawsha hubinta sooyaalkaaga.**

**Muhiim ah: Hanuuninta waa in lagu bogaa 45 maalmood gudahooda kadib marka aad soo gudbiso foomamka codsigaaga** (tallaabada 2).

## 5 Hel warqad soodhaweyn ah iyo lambarka bixiyaha

Kadib marka aad dhammayso tillaabooyinka 1 ilaa 4, waxa aad helaysaa nambar bixiyaha oo warqad soo dhawayn ah ugu jirta boostada. Lambarkan wuxuu kuu saamaxayaa inaad u shaqeyso Shaqaale Daryeelka Guriga ahaan.

## 6 Dhameystir tababarka shaqaalaha cusub

Isku diiwaangeli fasallada tababarka bilaashka ah ee ku jira Degelka Waxbarashada ee Carewell. Waxay yihiin online.

**Muhiim ah: Waa inaad ku dhameysato tababarka 120 maalmood gudahooda markaad hesho lambarkaaga daryeel bixiyaha.** Haddii aadan samayn, nambarku hadda ma shaqaynayo oo waa inaad mar kale is-diiwaangelisaa.

## 7 Samee xisaabaadkaaga si aad shaqo u hesho, saacadaha aad ula socoto oo aad lacag u hesho

Ka samayso akoon mareegta shaqada ee Carina. Waa halka aad isku beegi karto dadka raba inay shaqaaleeyaan taageerada daryeelka guriga. Haddii aad hore u garanaysay qof aad rabto in aad taageerto, maareeyaha kiiskoodu waxa uu soo gudbin karaa foom oggolaansho si uu kuugu oggolaado inaad la shaqeyso. Maamule kiis ayaa la shaqeeya dadka shaqaalaysiin kara taageerada daryeelka guriga.

Sidoo kale waxaad heli doontaa tilmaamo khuseeya sida akoon aad uga dhex samaysan karto Nidaamka Diiwaangelinta Wakhtiga Shaqo ee Adeeg-bixiyaha ee Oregon. Sidan

ayaad wakhtigaaga ula socotaa oo aad ku heli kartaa lacagta shaqada aad qabato.

**Waxaad samaysan kartaa labadan akoon waadna bilaabi kartaa shaqada inta aad ka dhammaysanayso tababarka.**

## 8 Hel oggolaansho inaad ula shaqayso qof kasta oo aad taageerto

Marka qof ku shaqaaleysiiyo, waxaad is kala shaqayn doontaan dejinta saacadaha iyo jadwalka shaqo labadiinaba. Maamulaha kiiskoodu ayaa kuu soo diri doona foomka oggolaanshaha.

Ma la shaqayn kartid qof ilaa aad ka hesho oggolaansho. Nidaamka Diiwaangelinta Waqtiga Shaqo ee Adeeg-bixiyaha ee Oregon ayuu ka soo muuqan doonaa hal ama laba maalmood gudahooda.

## 9 Bilow inaad shaqayso taariikhda lagu heshiiyay

Taageer dadka laguu oggolaaday inaad kula shaqaso gurigooda iyo bulshadooda dhexdooda.

Raac liiska adeegyada la ansixiyay ee uu ku siiyo qofka aad taageerayso. Geli saacadaha aad shaqayso Nidaamka Diiwaangelinta Waqtiga Shaqo ee Adeeg-bixiyaha ee Oregon.

**Shaqada muhiimka ah waxay ka bilaabataa halkan.**

Codso Hadda: OregonHomeCareJobs.com

Bixiyaha daryeelka guriga ee diiwaangashan ahaan, waxaad hadda heli kartaa **shahaadada horumarinta xirfadeed** ee ka socota Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon si loo kordhiyo mushaarkaaga saacadlaha ah.

Waxaad heli kartaa dukumeentigan luqado kale, daabacaad waaweyn, qoraal indhoolayaasha (braille), ama qaab kale oo aad doorbidayso, dhammaan bilaash. Iimayl udir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ohcc.customerrelations@odhsoha.oregon.gov ama wac (877) 624-6080. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaannada relay.

100-1098200_4HCW (09/2025) Somali